



SOMALI

Mudane Dijon DaCosta Sr., Guddoonka Guddiga
Marwo Deirdre P. Pierce, Guddoomiye Ku xigeenka
Marwo Anna Hill
Marwo Whitney McGinniss
Marwo Allyson Gevertz
Marwo Vickie B. Turner
Dhaqtar Joyce Morley

Dhaqtar Devon Q. Horton, Kormeeraha guud

Oktoobar 13, 2023

Qoyska Qaaliga ah ee Dugsiga Degmada Gobolka DeKalb,

Waxaan maanta idiinku soo qorayaa iyadoo lagu jiro waqti walaac iyo dareemo kacsan sabab la xiriirto dhacdooyinka dhawaan ka dhacay Bariga Dhexe. Inagoo dhammaanteen la tacaaleyno saameynta falalkaan foosha xun, waxaan rajeynayaa inaan la xiriirto qof walba oo ka tirsan qoyska dugsiga degmadeena si aan ugu kalsooni gelino oo aan u adkeyno muhiimada midnimada iyo feejignaanta inta lagu jiro waqtiyadaan adag.

Badqabka iyo faydada qabka ardaydeena, shaqaalaha, qoysaska, iyo bulshada ayaa ah kuwa ugu muhiimsan Dugsiga walbo Dugsiga Gobolka DeKalb (DCSD), xarun iyo dhismaha. Si taas loo gaaro, waxaan hoosta ka xarriiqayaa in, illaa iyo hadda, aysan jirin hanjabaado gaar ah ama falal rabshado ah oo laga soo sheegay dugsiyadeena oo la xiriira dhacdooyinka naxdinta leh ee dibada.

Si kastaba ha ahaatee, waxaan qaadnay tallaabooyinka badqabka oo dheeraad ah. Saraakiisheena Booliska DCSD, amniga xarunta, maamulada dugsiga, iyo shaqaalaha waxaa la faray inay si gaar ah uga feejignaadaan ogaanshaha iyo baarista qatar walbo iman karta ama qalalaasaha jireed ee la xiriira kara dhacdooyinka.

Weli, tan waa inay ahaataa dadaal wadajir ah. Kuma gaari karno badqabka gooniyeeynta, marka waxaan ku dhiirrogelineynaa dhammaan xubnaha bulshadeena, oo labada yar iyo weynba ah, inay si firfircoon uga qeybqaataan ollolaheena “*Arag Wax, Dheh Wax*”. Haddii adiga ama canugaaga aad la kulantaan ama ka shakisaan xaalad walbo aan badqab aheyn oo gudaha ama agagaarka dugsiyada- xattaa xaafadaheena- waxaan kugula doodeynaa inaad si degdeg ah ula socodsiiid shaqaalaheena. Ka qeybqaadashadaada dadaaladaan waxay muhiim u tahay xeeladeena badqabka guud ee guusha ah.

Waxaan sii wadeynaa inaan aamino in qadadka furan ee isgaarsiin u dhaxeeyo dugsiyadeena iyo qoysaska ay muhiim yihiin. Haddii aad qabtid wax su'aalo ama walaacyo ah ama aad u baahantahay warbixin dheeraad ah, fadlan haka caajisin inaad la soo xiriirtid maamulada dugsigaaga.

Waqtiyadaan aan la hubin, aan si midnimo ah u joogsano una go'aansano inaan u illaalino badqabka ardaydeena, shaqaalaha, qoysaska, iyo jaalalka bulshada sida mudnaanteena ugu sareeyso, oo ugu muqadasan. Waad ku mahadsantihin taageeradaada joogtada ah iyo fahamka. Wadajirkeena, waxaan sida ugu wanaagsan u hubineynaa in dugsiyadeena meel badqab ah u ahaadaan waxbarashada, kobaca, iyo hormarka.

Daacadnimo,

Dhaqtar Devon Q. Horton, *Kormeeraha guud*
Dugsiga Degmada Gobolka DeKalb